Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Hadal-qoraaalka kalfadhiga 4aad
Documentiga Kulankii 16aad **Taariikhda: 27/04/2014**

Kalfadhga 4aad
Kulankiisii 16aad
Saacada la furay: 10:15 am
Saacada la xiray: 1:40 pm
Guntanka: 156 xildhibaan

Ajendaha

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Gunaanadka Dooddii la xiriirtey warbixinta Guddiga Maaliyadda**
4. **Su'aal Wadareed Wasiirka Amniga Qaranka**
5. **iyo wixii kale oo howl ah**

Shir-Guddoonka: Guddoomiyaha Golaha Shacabka, Mudane Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari

Waxaa shirka furey Guddoomiyaha Golaha Mudane Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka kariimka uu Akhriyey Xildhibaan Sheekh Shaacir. Guddoomiyaha wuxuu xildibaanada uu weydistey in ay Ajendaha Ansixiyan weyna ansixiyeen.

Xildhibaan Maxamed Xuseen Xagafe wuxuu soo jeediyey in Guddiga difaaca waxey gaareen go'aan ku saabsan arimaha maaliyadda in ay joogeen mudo

3bilood ah ayna waxba ka ogeyn in ay waxba kala socon sida loo maamuley miisaaniyadda dalka sanadkii 2013kii. 25/6/2013 taliyaha ciidanka Xooga dalka soomaaliyeed, waxa uu qorey qoraal uu sheegayo in lagala noqdey wixii uu ku la haa saxiix guddiga maaliyadda waxey sameysey xad gudub xitaa waraaqaha F16, ineyna ku cadeyn.

Intaa ka dib Guddoomiye Ku xigeenka 1aad Golaha shacabka Mudane Jeylani Nuur Iikar waxa uu sheegey in ay runtahay arintaas, waa in guddiga maaliyadda iyo guddiga difaaca ay is arkaan ka dibna ay go'aan gaaran guddiga difaca waa in uu Baarlamaanka ka soo jeediyo.

Xildhibaan Xuseen Carab Ciise wuxuu sheegey, waxaan seken gareynayaa (hadalkii labaynayaa) xildhibaan xagafe, waa run in guddiga maaliyadda uu u yeero taliyaha ciidan-ka anagoon ka warqabin waa in la soo celiyaa sistamkii hore.

Xildhibaan Sheekh Aadan madeer wuxuu soo yidhi warqad ayuu noo keeney xog'heynta ku socoto guddiga maaliyada. Anaga nama quseyn, anaga miisaaniyadda ayaan koontaroolnaa. warqada Guddoonka ayaan u soo gudbiney, taliyaha waxan kala hadelney miisaaniyadda oo kaliya.

Guddoomiye ku xigenka 1aad Mudane: Jeylani Nuur, waxa uu sheegey ,waa run warqada markii la ii keeney waxaan u gudbiyey guddiga difaaca.

Xildhibaan Maxamud Maxamed Xeyd wuxuu sheegey, gobolada gaajo ayaa loogu dhimanayaa. Kuwo kalana oon bey u dhamaadeen waana go'doon. Ha lo xawilo lacag. in dadkeena u dhamaado biyo la'aan iyo gaajo waa ceeb.

Xildhibaan Siciid Maxamed Cali wuxuu sheegey, miisaaniyadda 3qeybood ayaan ka abaarayaa sida loo soo dhisey waxbaa ka dhiman. Waxey aheyd wasaarad kasto in ay ayaga soo diyarsadaan. Guddiga si fiican ayuu u soo shaqeeyey. Guddiga maaliyadda iyadaa xooga saartey meelihii ay ka jarjareen ma cada iyo meelihii ay galiyeen. Guddiga difaaca waxa loo idmadey u kuurgal iyo daba gal saxiixa waxa iskaleh guddiga.

Xildhibaan Cali Xuseen Elow wuxuu soo jeediyey,miisaaniyadda 2014 inta aan la galin waxey aheyd in xisaabtii hore lagu sameeyo xisaab celin oo Barlamaanka la keeno, taasna waxey keeneysaa la xisaantan la'aan,waxaa kale oo la weydiiyey mushaarka ciidanka iyo darajooyinkiisa mudo 15malmod ayay

qabsaden ilaa hada wax jawaab ah lagama haayo, tan kale mudo 3bilood ah sidee shaqaalaha u mushaar la'yihiin Guddoomiye adinkana qeyb ayaad ku le-didiin wasaarada maaliyadda iyo guddiga maaliyada arintaan ha ka soo jaw-aabaan shaqaalaha waa in mar kasto la siiya.

Xildhibaan Ibraahim Saalax Deyfulah wuxuu sheegey,waxaan u mahad celinayaa guddiga maaliyadda ,waxaa jirta in meelo qaarkood laga soo jarey oo wax kordhis laheyn waxa laga rabaa cadeyn,arinta ciidanka waxaa mar hore na soo gaartey warqad runtii waan ku faraxney, ilaa iyo hada waxan garaney in aysan gaarin wasaarada maaliyadda, guddiga Dastuurka 2014 waxa u taal shaqo aad u balaaran buugan yar ee Dastuurka waxaa ku baxdey lacag aad u badan waxa ka buuxa caqabad aad u fara badan guddiga waxaa loo soo gudbiyey miisaaniyad aad u yar oo aan u qalmin, waa in naloo kordhi-yaa.

Xildhibaan Cusmaan Aadan Dhuubow wuxuu soo jeediyey, wey ku mahads-an yihiin guddiga miisaaniyada shaqada ay qabteen ma sugna ciidanka miisa-aniyadisa waa in dib u ee-gis lagu sameeyo wey mudan tahay, tan siyaasiyinta dadaal badan ayaan dareemayaa waa in la siisaxo oo si aad ah isaga sii eegan guddiga dhimista Baarlamanka wuxuu soo galayaa dhanka siyaasiyinta waa in laga dhimaa 5%, waa dareemayaa dhanka dan yarta in loo daneeyo ,waa in lakeenaa wakaaladii xooga korantada iyo wakaaladii biyaha, waa in la furaa jaamacadah iyo iskuulada dowlada, iskuulada waxa heysta shaqsiyaad oo dhamaan magaci waa laga bedeley dhanka wakaalada howlaha maraakiibta iyadana waa in lakeenaa waayo waxa dhici karta in naloo keeno markiib naga maqan.

Xildhibaan Cabdulahi Jaamac wuxuu sheegey, in canshuurta lagu qaado siyaasad bajedkana kama muuqato Baarlamaankana lama horkeenin markii canshuurta la kordhiyey badeecadii waxey u wareegtet meelo kale sida, kismayo, iyo boosaso, anaga waxaan isticmaalnaa shilin soomaaliga hanalak-adayo Dolarka, waa in la cadeeyo nidaamka lagu ururinayo canshuuraha,wa-xaa laga yaabaa in ay galin dowlada oo shaqsiyad jeebkooda ay gasho,hey'ad-aha waa weyn waa in ay ku shubaan Bankiga Dhexe,waxaan qabaa in guddiga sax yihiin in ay ka sinaadaan lacagta ay qaadanayaan wasiirka xildhibaanka iyo kan bananka ka yimid.

Xildhibaan Xuseen Maxamuud Sheikh Xuseen wuxuu soo jeediyey,miisaniyada 38% waxey ku sheegeen mushaar, sahey safar, dayactir, 4% ayaa loogu tala galey bulshada, sida waxbarasho, caafimad,biyaha, miisaaniyada looma eegin si cilmiyeysan,waxaan qabaa inaan qaadano sida uu soo jeediyey guddiga ka dib loola tago wasarada maaliyadda.

Guddoomiyaha ayaa guddiga farey in ay is arkaan wasiirka maaliyadda ka dibna wixii go'aan ah in ay u soo gudbiyaan Golaha Baarlamaanka.

Guddoomiyaha ayaa soo jeediyey, waa in la soo buuxiya kursiga banan ee marxuunkii Isaaq Maxamed Cali (Rino) iyo C/casiis Isaaq Mursal, oo uu soo Magacabey Malaaq Aadan Cabdiyow,waa in uu soo magacabaa Xildhibaan Cusub, Marxuun C/casiis Malaaqii soo magacaabey waa geeriyoodey, hase yeeshee beesha hano soo gudbiyaan malaaqa cusub ay doortaan si aan u diiwan galino.

Intaa ka dib Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey,in xidhibaano gaaraya 15xildhibaan ay soo saxiixen mooshin ku saabsan in wasiirka koowad iyo Wasiirka Amniga Qaranka iyo wasiirka Arimaha Gudaha in ay horyimaadaan Golaha Baarlamaanka, si su'aal wadareed loo weydiiyo.

Guddoomiyaha ayaa uyeerey qofkii akhrin lahaa mooshinkii la soo gudbiyey.

Xildhibaan Cabdulaahi Abshirow wuxuu sheegey, waxaan akhrinayaa mooshinkii xildhibaanada ay saxiixen, ooku saabsanaa in Golaha Baarlamaanka ay horyimaadaan Wasiirka kowaad,Wasiirka Amniga Qaranka,Wasiirka Arimaha Gudaha.

Intaa ka dib Guddoomiyaha ayaa ku dhawaaqey Ajendaheena qeybtii 2aad waa inoo furan tahay.

Xildhibaan Cabdiladiif Sanyare wuxuu soo jeediyey,dhacdadii 21/2/2014 ee ka dhacdey madaxtooyo shabab wey qirteen looma jawaab celin cidee u fududeysey in ay soo galaan madaxtooyo? Waxaan heynaa in 22 hey'adood oo security bireyfad ah in la tababaro ayagoo ay joogaan ciidamada soomaaliyed oo kala ah Bolis,nabadsugid, x.d.s.

Xildhibaan Cabdi Macalin Aadan wuxuu sheegey, ciidankii boliska soomaaliyeed ee geeriyoodey agoontii in aysan heysan wax xuquuq ah oo ay dayacanyihiin oo laga jarey raashinkii, muxuu noqonayaa askariga kale ee jooga oo

saaxiibkiis ah, waxaa jira naafo badan oo xanuunsan wadankana wax looga qaban waayey.

Xildhibaan Cabdi Rashiid Xidig wuxuu soo jeediyey, waxaa la sheegey in si degdeg ah amniga wax looga qabandoono taasoo noqotey beerjilecsi waqti dhumis wasiir ma adigaa u la heyn aqoon? Mase waajibka laguu idmadey ayad ka soo bixi weysey? Dhacdadii ka dhacdey N0.50, iyo tixsiile,muuri, balcad, iyo dhacdadii odayaasha dhaqanka ee lagu laayey Buur Hakabo, Wasiir ciidamadaada waxey sheegteen in ay gacanta ku hayaan cidii ka danbeysey falalkas foosha xun, Wasiir markii aad ku fashilantey adiga iyo wasiirku xigeenka iyo agaasimaha diyaar ma u tihiin in aad is casishaan Ciidamadanka shabeel aad u bixiseen oo la kala direy ilaa hada xagey ku danbeeyen.

Wasiirka Cabdi kariim Xusen Guled waxaan aad iyo aad ugu faraxsanahay in Baarlamaamka madashiisa aan soo hor istaagey isagoo Baarlamaanka waajibkiisa Qaran ka saran uu gudanaayo ayna ugu horeyso la xisaabtanka hey'adaha waxey qabteen iyo wixii ay ka gaabiyeen, anagana waxaan isku aragney in aanahay dad lala xisaabtamikaro su'aalana laweydiinkaro, Mudane:Guddoomiye iyo mudanayaal waxaan codsan lahaa inta aan bilaabin su'aalaha jawaabtooda, maadaama ay dhici karto jawaabaha aan haayo in ay yihiin xog aad iyo aad u weyn oo taaban karto Amniga Qaranka iyo ciidamada dalka,waxaan codsanayaa in ay saxaafada dibad joogka ahaadan, fadhiga in uu noqdo fadhi xiran, waa hadii xildhibaanada ay doonayaan in aan siiyo jawab buuxda oo shaafin karta su'aalahooda, xildhibaanada xaq ayay u leeyihiin in ay iwey diiyaan waa waajib leygu leeyahay in saafada dibad joog ka ahadan.

Guddoomiyaha waxa uu soo jeediyey,sida uu qabo Qod:37 ee Xeer-Hoosadka daah furnaanta fadhiyada Golaha Farqadiisa 1aad waxey oraneysaa waxey u furan yihiin dadweynaha hadii uusan Golaha si kale u go'aamin, hadii adinka aad go'aami-saan waan ka bixineynaa saxaafada, marka waxaan codsanayaa in uu Golaha go'aamiyo, ma ogoshihiin in fadhiga uu noqdo mid xiran, arin cadbaa la idiin wediiyey xildhibaano xeer-hoosadka waa cad yahay.

Intaa ka dib Guddoonka ayaa sheegey in cod loo qaadayo hadii saxaafada ay dibad joog ka ahaaneyso iyo in saxaafada ay joogayaan.

Codkiina sidan ayuu u dhacey:

Inta Ogol ---------- 100 xildhibaan

Inta Diidan---------- 41 xildhibaan

Inta Amustey---------- 8 xildhibaan

Intaa ka dib Guddoomiyaha waxa uu ku dhawaaqey codkii la qaadey

Oo kala ahaa in saxaafada ay joogan iyo in saxaafada dibada loo sarayo

Waxaa ku guuleystey in saxaafada ay joogaan**.**

Guddoomiyaha ayaa soo jeediyey,sida uu qabo xeer-hoosadka dooda waxey soconeysaa (halsac iyo bar) ka dib waa la joojinayaa.

Wasiirka: C/kariim Xuseen Guuled Baarlamaanka waa mahadsanhay koley waxaan ku qasbanahay inta karaankeyga su'aalaha ley wediiyo aan bixiyo wixii ay u muuqato in amniga qaranka Qatar ku tahay waan sheegi doonaa. Su'aasha kowaad oo ku saabsan dhacdadii 21/2/2014 ee ka dhacdey madaxt-ooyada J.F.S. dhacdadas waxaa loo saarey guddi Gole Wasiira ah iyo saraakiil sar-sare iyo qubaro ku taqasusey Baaritaanka dambiyada, waxaan caawinad weydiisaney hey'ado dibada oo ah dowlado aan saaxiib nahay si baaritaanka ay qeyb ugu noqdaan, baaritaankii waa soo gaba-gaboobey qeybtiisa koowad.

Riboot buuxana waa laga diyaariyey waxaana u gudbiney dhamaan hey'adihii ku shaqada lahaa, qeybihii kale oo aheyd dowladihii aan gacanta weydiisaney oo baaritaan kaas ka qeyb qaatey wey socotaa baaritaanka , waxaan codsana-yaa aniga hada halkaan kuma hayo natiijadii laakiin guddiga amniga u qaabi-lsan Baarlamaanka ayaan la wadaagayaa aniga diyaar ayaan u ahay.

hey'adah Ku saabsan Baranjis security aniga waxaan Rejisgareyey 4hey'adood oo kali 18 hey'adood dowladihii iga horeeyey ayaa rejisgareyey shuruucdas iyo nida-myada loo adeegsadey iyo qaabka ay ku shaqeynayaan, waxaa dajisey wasa-aradihii iga horeeyey, aniga waxaan u raacey nidaamkaas marka aan aragney hey'adahas iyo qatarta ay leeyihiin xaalada sida ay noqon karto dowladaha aan tusaale u soo qaadan karno sida, ciraaq, iyo afganistan hey'adaha nocan oo kale duruufo badan iyo xaalado la soo

gudboonaadey, waxaan u gudbiney golaha wasiirada, warbixin gudiga amniga qaranka oo aan leenahay hey'adahas iyo qaabkey u sheynayaan.

waxey u baahanyihiin qaab sharciyo faah-faa-hsan kana dheeri ah qaabka aan hada ku shaqeyno oo aan anaga ka dhaxaln-ey wasaaradihii hore, waxey u baahanyihiin in dib u eegid dhab ah lagu sam-eyo baahida dhabta ah ee loo qabo iyadoo la bar-bar dhigayo qatarta ay yeel-an karto, warbixintaas ayaan u gudbiney golaha wasiirada iyo Guddiga am-niga Qaranka waa amar ka soo baxey guddiga amniga qaranka inta looga helayo shuruuc nidaamsan hey'ad cusub oo baranji security lama sharciy-ey kara kuwo hada jiraan hadii leysinka dhaco looma cusbooneysiin karo.

Walaalkey xidig waxa uu i weydiiyey arin uu ku dhaliilayo hey'adaha amniga xil gudasho la'aan ayaa jirta dabcan wasiir ahaan waa ley dhaliili karaa hey'-adaha waa la dhaliili karaa Baarlamaanka xaqbuu uleeyahay waayo waa cidii nala xisaab tameysey, waxaan rabnaa iyadoo leys dhaliilayo in leys ixtira-mo aan is weyneyno Baarlamaanka aan la wadaago xogtaan yarta ah oo muujineysa qeyb ka mid ah hey'adaha amniga sida ay u shaqeyan iyo waxa ay qabtaan waa xog aan ka soo ururiyey wax qabadkii hey'adaha amniga waq-tigii bilihii Jan, Feb,Marso. wax qabadkoodii aan ku soo ururiney xuuran iyo xog raadin ooay heleen Wasaarada Amniga Qaranka, oo ay sameeyen howl galo 90cisho ah, kuligood lid ku ah Amniga Qaranka ama dowlada ayayQatar ku yihiin xogta ay heleen waa (8,559) qof xogta lagu howl galey waa (2690) qof.

Xogood oo dhab ah wali baaritaan iyo in la hubiyo ayaa socoto(2046)qof xog ayaa la heley hey'adah amniga waxaan la wadaagnaa ciidamada X.D.S. iyo Amison waayo waxaan u aragnaa xog Qatar ku ah oo in ay ka digtoonadan in ay tahay howl galka waxa lagu soo gaba-gabeeyey 90cisho, xogtaas howl galka lagu soo qab-qabtey waa (1169)qof waa kala duwan yihiin dadka la tuhm-ey laa kiin marka la kal shaan dheeyey, dad tuhunkooda uu culus yahay oo waxa lagu soo qabtey ay runtahay(1288) qof dambigiisa uu dhameystirneyn uu noqdey maxkamad suge waa (404)qof ayaa maxkamad loo gud biyey inta Al-shababka ah oo la leeyahay guri hebel ayaa laga soo qabtey oo taarged ah waa (265)qof shabakadooda oo al-shabab ay lee dahay ee la bur-buriyey waxey tahay 3qof-9qof, hadii hal qof laga soo qabto wey bur-bureysaa (62) qof waa hub taarged ah, hadii magaaladas laga soo qabt-ey qadkey ka saaraan, (11%) wey u hergashey, waa lagu guuleysan waayey in

la fishiliyo 25/2/2014, fal ay geysteen (105) hey'adaha amniga ayaa fashiliyey,hey'adaha amniga inta ay cadowga ka guuleysteen ayaa badan, jidadka xiran waxey ka mid tahay amniga aniga waxaan ka mid ahaa qoladii Ra'isal Wasaaraha uu uyeerey uu yiri jidadkan maxey u xiranyhiin soo qiimeya,

Arintii tixsiile nimankas waxey ahaayeen burcad oo dareyska qaadatey waa la soo qab-qabtey 8qof ayay ahaayen gawaaridii ay adeegsaden waa laga qaadey 30 waa dhawac, caruurtii agoonta ah waxey ka tirsan yihiin ciidanka booliska soomaaliya, aniga ma ogeyn in laga jarey raashinkii waan baareyneynaa cidii ay ku cadaato cadaalada ayaan hor keyneyna, arinta naafada waxey ka mid yihiin ciidamada qaranka soomaaliyed askariga xuquuqda uu leeyahay ayuu isagana leeyahay, laakiin wax qabadkooda xaga caafimadka waxaa jirta kuwo dalka aan wax looga qaban Karin waad ogtihiin dibada caafimaadkiisa waa qarash badan hadba waxeyna ku xiran tahay miisaaniyada

Dowlada, waxaa jirta dowlado aan saaxiibka nahay aan kula jirno hishiisyo si gacan nooga sii yaan sida Emaradka ayiga laftooda inta ay qaadaneysa iyo baahidooda lama oga, ayaan dhaweyt xafiiska U.N. ka waardiyayaasha waxa ka dhacay leysinkii bisha Jan, waxey soo codsadeen in loo cubooneysiyo iyadoo la qadarinayo duruuftooda gaarka ah, waxaan u gudbiyey gudiga amniga qaranka, waxaa guddiga ay u faristeen labo maal-mood,maloo cubooneysiiya mase waa leyska daayaa, ugu danbeyn 3bilood ayaa loo cusbooneysiiyey 3bilod dhexdeeda hey'adaha amniga qaranka waa in ay kala shaqeyan, in la dhiso diplomatic bolis unit ayaan wada shaqeyn kula jirnaa hey'adaha U.N.ka iyo qamada midoobey xaalada meelahas ayey mareysaa, hadii unit kasto la dhiso baahida loo qabo hey'adahaas ajnabiga meesha wey ka baxeysaa unit ka waxaan ugu tala galney in ay ilaaliyaan hey'adah dowlada iyo safaaradaha si baahi loo qabo meesha ugu baxaan.

Wasiir waxaa jirta inta shirkii Hotel Al-Jasiira aad ku jirtan xidhibaano ayaa geeriyodey dad badan ayaa dhintey, meelihii la xoreeyey dadka waa dhibaateysan yihiin sida, qoryoley, bay, bakool, wasiir waa fashilantey in aad is casisho diyaar ma u tahay, mudanayaal xogta waad u baahan tihiin anigana in aan ka jawabo boblic iyo saxaafada horteeda , waxan kaloo idiin sheegayaa in (470)ciidan bolis ah waxey waardiyeyan masu'liyinta qaranka in taas iyo in ka badan ayay mu teysteen, xildhibaan C/laahi: habdhowre waan ka xumahay isagoo xildhibaan qaran sidas loogalo waxaan balan qaadayaa in aan wax ka qabto waan cudur daaranayaa, howl galada habeenkii amaanka ayaa

lagu sugayaa waxa la raadinayaa taarged, waxaa jirtey marka baasaborka la daabacayo qofka sawirkiisa ayaa lagu dhajiyaa hada goorta uu soo baxo ayaa lagu dhjiyaa, waxaa igu maqaalo in (46ooo) in ay sameysey dowladena hase yeeshee dad kale uu gacanta uu ugu jiro baasaborkena hawada ayuu kabaxey oo meelo kale ayaa loo suuqgeya, ma sheegi kartaa xilga baasaboorkeena la xirey ay gacanta ku heysey wasarada amniga qaranka , waxaa jooga taliyihii waaxda socdaalka Gaafow isagaa ka jawaabaya, wasiir waad ku fashilanteen diyaar ma u ti hiin in aad iscasishaan.

Intaa kadib Guddoomiyaha Golaha ayaa sheegey in ay hor yaalaan Baarlamanka ajandooyin fara badan, waxaan dooneynaa in bari dhaqso la yimaado si howsha dhaqso loo dhameeyo.

Shir Guddoonka, Guddoomiyaha Golaha Baarlamaanka MudanemMuxamed sheekh cusmaan jawari, oo shir Guddoominayey, kalfadhiga 4aad kulankiisa 16aad ayaa sheegey in uu shirka xiran yahay sacada markey aheyd 1:40 pm.